

**Sii wadida Shaqooyinka Maxkamada Ohio ayadoo uu jiro Amarka  
Guri Joogista  
Shaacinta Xaalada Degdega ah ee COVID-19**

**OGAYSIIS**

Sababo la xariira walaacyada caafimaadka dadwaynaha ee ka dhashay safmarka COVID-19, maxkamadaha Ohio waxay sii wadaan shaqadooda si xadidan ayagoo la raacaaya Amarka Joogista Guriga ee Waaxda Caafimaadka Ohio iyo Amarka Fulinta ee Gudoomiyaha gobalka mudane Mike DeWine oo tirsigiisu yahay 2020-01D, Kaasoo Lagu Shaaciyay xaalada Degdega ah. Marka la joojiyo amarada ama uu joogsado cudurka COVID-19 inuu khatar ku yahay gobalka, maxkamadaha Ohio ayaa sii wadi doona shaqooyinkoodii caadiga ahaa.

**Tilmaan Ku socota Dadka aan Ingiriis Si fiican Ugu hadli karin  
Raadsashada Adeegyada Maxkamada**

**HELITAANKA ADEEGYADA MAXKAMADA**

Sabab la xariirta xaalada degdega ah ee caafimaad oo uu keenay koronafayras, maxkamaduhu way sii shaqayn doonaan laakiin waxaa saaran xayiraado qaarkood. Fadlan wac ama booqo websetka maxkamada kahor intaadan toos u tagin xarunta maxkamada.

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Websetka)

---

Waajibaadka xeer beegtida ayaa la joojiyay maanta sabab la xariirta walaacyo laga qabo koronafayras. Wixii xog dheeraad ah, fadlan wac ama booqo websetka maxkamada.

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Websetka)

---

Sabab la xariirta xaalada degdega ah ee cudurka koronafayras, mar kasta oo ay suuragal tahay, fadlan u jirso ugu yaraan **6 fiid** dadka kale ee jooga maxkamada. Fadlan sidoo kale xiro maasgaro, ku dabool qufacaaga iyo hindhisadaada dhudhunkaaga, si joogto ah u dhaq gacmahaaga, oo raac talooyinkii ugu danbeeyay ee kasoo baxay waaxda COVID-19 ee Ohio iyo Xarunta Xakamaynta Cudurka (Center for Disease Control (CDC):

Ohio COVID-19

<https://coronavirus.ohio.gov/wps/portal/gov/covid-19/home>

Xarunta Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurada (CDC, Center for Disease Control and Prevention):

<https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/prevent-getting-sick/prevention.html>

## **Maxkamada Carruurta**

### **FURAN LEHNA XAYIRAADO**

La xariir maxkamada carruurta (webseetka qaybta maxaliga ah) kahor intaan la gaarin xiliga dacwadaada, maadaama dacwado iyo dhagaysiyo badan dib loo dhigay ama la samayn doono taariikh danbe. Kiisaska ay maxkamadu u aragto kuwo degdeg ah ama xaalad muhiim ah, sida dhagaysiga kasaarida ilmo daryeelka qof iyo codsiyada amarka difaaca ilmaha, ayaa wali la dhagaysan doonaa.

Maxkamadu waxay sii wadi doontaa inay dhagaysato dhagaysiyada amarka difaaca ilmaha, ayadoo hal dhinac goob joog yihiin\* (ex parte). Maxkamada ayaa dhagaysan doonta qaar ka mid ah dacwadaha dhagaysiga oo buuxa (oo labada dhinacba joogaan\*) si loosoo saaro amarada dacwada madaniga ah ee difaaca ilmaha. Dukumiintiyada gudbinta dacwada ayaa laga heli karaa oonleenka (lifaaqa):

(webseetka maxaliga ah)

[http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection\\_forms/juvenileForms/default.asp](http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection_forms/juvenileForms/default.asp)

Maxkamadu waxay adeegsanaysaa tignooloojiyada fog si ay u samayso dhagaysiga markay haboon tahay. Sidaas awgeed waxaa lagaa codsan karaa inaad uga qaybgasho dacwada dhanka khadka taleefanka ama muuqaal ahaan. Waxaa lagu sheegi doonaa qaabka aad uga qaybgalayso. Turjumaan ayaa lagu keenayaa, haddii ay lama huraan tahay.

*\*Ilaa in maxkamadu ay mar hore aqbashay maahee, dhinacyadu masoo ka xaysan karaan saaxiibo ama qaraabo si toos ah u imaanaysa dhagaysiyada marka laga reebo inay yihiin u doodayaasha dhibanaha ama uu yahay qofka bixinaaya taageerada dhibanaha ku jira kiiska amarka difaaca madaniga ah.*

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH FADLAN WAC AMA BOOQO:**

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Webseetka)

---

## **Maxkamada Cadaynta**

### **FURAN LEHNA XAYIRAADO**

Kala xariir Maxkamada Cadaynta (webseetka maxaliga ah) arimaha la xariira isbadalada ku imaan kara saacadaha maxkamada iyo shuruudaha dacwad gudbinta si aad u gudbiso dukumiintiyada muhiimka ah ee la xariira masuulnimada degdega ah, codsiyada ruqsada guurka, adeegyada difaaca qofka wayn, dacwooyinka madaniga ah ama kiisaska caafimaadka dhimirka, iyo korinta ilmo aadan dhalin. Maxkamadu waxay adeegsanaysaa tignooloojiyada fog si ay u samayso dhagaysiga markay haboon tahay. Sidaas awgeed waxaa lagaa codsan karaa inaad uga qaybgasho dacwada dhanka khadka taleefanka ama muuqaal ahaan. Turjumaan ayaa lagu keenayaa, haddii ay lama huraan tahay.

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH FADLAN WAC AMA BOOQO:**

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Webseetka)

---

## **Amarada Difaaca Madaniga ah ee Xariirada Qoyska**

### **FURAN LEHNA XAYIRAADO**

La xariir maxkamada xariirada qoyska (webseetka qaybta maxaliga ah) kahor intaan la gaarin xiliga dacwadaada, maadaama dacwado iyo dhagaysiyo badan dib loo dhigay ama la samayn doono taariikh danbe. Maxkamadu way sii wadaysaa inay dhagaysato masuuliyada xaalada degdega ah iyo amarka difaaca madaniga ah ayadoo hal dhinac xaadir yahay\* (ex parte) iyo dhagaysiyada qaar oo buuxa (labada dhinacba soo xaadirayaan\*). Maxkamadu waxay adeegsanaysaa tignooloojiyada fog si ay u samayso dhagaysiga markay haboon tahay. Waxaa lagaa codsan karaa inaad uga qaybgasho dacwada dhanka khadka taleefanka ama muuqaal ahaan. Waxaa lagu sheegi doonaa qaabka aad uga qaybgalayso. Turjumaan ayaa lagu keenayaa, haddii ay lama huraan tahay.

Dukumiintiyada gudbinta dacwada difaaca madaniga ah ayaa laga heli karaa oonleenka (xiriirk):

(webseetka maxaliga ah)

[http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection\\_forms/DVForms/default.asp](http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection_forms/DVForms/default.asp)

*\*Ilaa in maxkamadu ay mar hore aqbashay maahee, dhinacyadu masoo ka xaysan karaan saaxiibo ama qaraabo si toos ah u imaanaysa dhagaysiyada marka laga reebo inay yihiin u doodayaasha dhibanaha ama uu yahay qofka bixinaaya taageerada dhibanaha ku jira kiiska amarka difaaca madaniga ah.*

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH FADLAN WAC AMA BOOQO:**

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Webseetka)

---

## **Amarada Difaaca Ku meel gaarka ah ee Danbiga ee Maxkamada Magaalada**

### **FURAN LEHNA XAYIRAADO**

Maxkamadu waxay dib u dhigtay dacwadaha iyo dhagaysiyada taraafiga iyo kisaska gaadiidka ee aan rabshada la xariirin. Maxkamadu waxay dhagaysan doontaa dacwooyinka iyo codsiyada asmarada difaaca danbiga ee ku meel gaarka ah\*. Dukumiintiyada gudbinta dacwada ayaa laga heli karaa oonleenka (lifaaqa):

(webseetka maxaliga ah)

[http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection\\_forms/DVForms/default.asp](http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection_forms/DVForms/default.asp)

[http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection\\_forms/stalkingForms/default.asp](http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection_forms/stalkingForms/default.asp)

Dhagaysiyada waxaa lagu samayn karaa taleefanka ama shirka muuqaalka ah. Waxaa lagu sheegi doonaa qaabka aad uga qaybgalayso. Turjumaan ayaa lagu keenayaa, haddii ay lama huraan tahay.

*\*Ilaa in maxkamadu ay mar hore aqbashay maahee, dhinacyadu masoo ka xaysan karaan saaxiibo ama qaraabo si toos ah u imaanaysa dhagaysiyada marka laga reebo inay yihiin u doodayaasha dhibanaha ama uu yahay qofka bixinaaya taageerada dhibanaha ku jira kiiska amarka difaaca.*

Fadlan la xariir maxkamada deegaankaaga si aad u hesho tilmaamaha ku aadan sida loo codsado amarka difaaca inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka.

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Webseetka)

---

## **Maxkamada Codsiga Cafiska guud, Amarada Difaaca Dadka La daba dhigto**

FURAN LENA XAYIRAADO

La xariir maxkamada cafiska guud (webseetka qaybta maxaliga ah) kahor intaan la gaarin xiliga dacwadaada, maadaama dacwado iyo dhagaysiyo badan dib loo dhigay ama la samayn doono taariikh danbe. Maxkamadu way sii wadaysaa inay dhagaysato dacwadaha iyo difaaca dadka la daba dhigto ayadoo hal dhinac xaadir yahay\* (ex parte) iyo dhagaysiyada qaar oo buuxa (labada dhinacba soo xaadirayaan\*). Maxkamadu waxay adeegsanaysaa tignooloojiyada fog si ay u samayso dhagaysiga markay haboon tahay. Waxaa lagaa codsan karaa inaad uga qaybgasho dacwada dhanka khadka taleefanka ama muuqaal ahaan. Waxaa lagu sheegi doonaa qaabka aad uga qaybgalayso. Turjumaan ayaa lagu keenayaa, haddii ay lama huraan tahay.

Dukumiintiyada gudbinta dacwada ayaa laga heli karaa oonleenka (lifaaqa):

[http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection\\_forms/stalkingForms/default.asp](http://www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/protection_forms/stalkingForms/default.asp)

*\*Ilaa in maxkamadu ay mar hore aqbashay maahee, dhinacyadu masoo ka xaysan karaan saaxiibo ama qaraabo si toos ah u imaanaysa dhagaysiyada marka laga reebo inay yihiin u doodayaasha dhibanaha ama uu yahay qofka bixinaaya taageerada dhibanaha ku jira kiiska amarka difaaca.*

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH FADLAN WAC AMA BOOQO:**

(Lambarka Taleefanka Maxaliga ah iyo/ama Webseetka)

---